

MADAXA TOODOBAAD

JOOJINTA DACWADDA KALA GO'IDDA IYO DHICIDDEEDA

QAYBTA KOOWAAD

JOOJINTA DACWADDA

Qodobka 207aad

Joojinta khasabka ah

Wuxuu amrayaa garsooruuhu joojinta qaadista dacwadda madani-ga ah marka lagu sheegay qodobka 272 ee ka mid ah xeerka habka ci-qaabta iyo markasta oo kale ee go'aanka dacwaddu ku xiran yahay kala-bixina dacwad kale ee maacani ana idaari ah.

Qodobka 208aad

Joojinta ay weydiistaan dhinacyadu

Waa u bannaan tahay Maxkamadda haddii ay dhinacyadu heshiis ku yihii ay amarto in la joojiyo qaadista dacwadda muddo aan ka badnayn saddex bilood.

Qodobka 209aad

Qabasho fadhi cusub joojinta kaddib

Haddii ayna Maxkamaddu ku qaban amarkeedii joojinta taa-riikhda ay waajibka tahay in la qaado dacwadda waxaa waajib ku ah dhinacyada inay weydiistaar in taas loo qabto waqtii go'an oo muudaa-diisu tahay afar bilood oo ka billaabanaysa waqtigii ay dhammaato sababtii keentay joojinta.

Weydiisiga waxaa loo keenaya Garsoorihii billaabay qaadista Dacwadda ama Goddoomiyaha Maxkamadda tobant beri ka hor ugu ya-raan waqtiga dhammaanshaha muddada la soo sheegay.

Qodobka 210aad

Waxyaabaha ka dhalanaya joojinta

Ma bannaana in lagu kace tillaabo ka mid ah tillabooyinka qa-a-dista dacwadda mar haddii la joojiyey dacwadda. Wixii muddoyin ho-rey u socdeyna wey joogsanayaan oo waxay dib uga billaabanaysaa taariikhda fadhiga lco qabto in lagu wado Dacwadda.

QAYBTA LABAAD

KALA GO'IDDA QAADISTA DACWADDA

Qodobka 211aad

Dhimashada ama waayiada dhinaca awooda
ka hor intuusan dacwadda ka qaybgelin.

Dacwaddu way kala go'aysaa haddii ay geeri ku timaado
dhinacyada m.dkood ama wakiilkiisa sharciga ah ama uu waayo
awooda, ama ay dhacdo wilaayadu, inta uusan Dacwadda ka soo
qaybgelin, haddii uusan iskiisa u imaan qofka xaqa u leh dacwadda
wadiddeeda ama uusan dhinaca kale u yeerin.

Qodobka 212aad

Dhismaha ama waayidda awooda dhinaca ka soo
qaybgalka Dacwaadda kaddib

Dacwadda sidoo kale way kala go'aysaa haddii la helo wax ka-
mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay qodobka hore inta qaadista dac-
wadda la diyaarinaayo.

Haddii la helo sabab ka mid ah kuwa kor lagu sheegay, kaddib
markii dacwadda loo diray xukun, taasi ma saamaynayso go'aanka

Qodobka 213aad

Dhimashada Wakiilka ama wax reeba ka qaybgalka

Dacwaddu way kala go'aysaa, haddii uu dhinto Wakiilka Sharci-
ga ah, ama laga tirtiro diiwaanka wakiillada ama laga joojiyo, kala
go'idduna way soconaysaa ilaa dhinaca laftiisa ka yimaado ama wakiil
magacawdo.

Ka noqoshada Wakaaladda ama ka tanasulkeeda ma keenaayc
kala go'idda dacwadda.

Qodobka 214aad

Dhaqaajinta Dacwadda

Waa bannaan tahay dhaqaajinta dacwadda ku kala go'day sabab
ka mid ah sababaha lagu sheegay qodobka hore, haddii uu wey-
diisto dhinacyada midkood saddex bilood ahxhood oo laga soo bil-
laabayo markii kala go'a la helay.

Qodobka 215aad

Waxyaabaha ka dhalanaayo kala go'idda

Kala go'idda waxaa lagu dhaqayaas Qodobka 210. Haddii aan
Dacwadda lawadin, ama aan la dhaqaajin mudcoyinka lagu caddeeyey
qodobbaaca hore lagu sheegay, way dhacaysaa Dacwaddu.

QAYBTA SADDEXAAD

DHIGIDDA DACWADDA

Qodobka 216aad

Ka tanaasulidda Dacwadda

Dacwaddu waa dhacaysaa haddii d'hinacyada oo dhan ay ka tanasulaan tallaabooyinka ku saabsan Dacwadda iyaga oon ku xirin wax ka qabid ama shuruud.

Garsooruhu wuxuu go'aan racfaan la'an ah ka soo saarayaa qad-diraadda kharajka haddii sidaas dhinacyadu ku heshiyaan ama iskiiba.

Qodobka 217aad

Dhicidda Dacwadda ee foojig la'aanta dhinacyada ka dhalatay

Dacwaddu wax kale oo ay ku dhacaysaa foojig la'aanta dhinacyada haddii midkoodba ka soo qayb geli waayo, ama asagoo ka soo qayb galay laakiinse aan imaan fadhliga hore iyo kan dambeeyaa ee Garsooruhu qabtay.

Sidoo kale dacwaddu way dhacaysaa haddii la joojiyey, dhinacyaduna ayna dhowrin muddoyinka lagu dhaqaajiyo Dacwadda.

Dhicidda waxaa amar ama xukun ku caddaynaya Garsooraha, waxayna leedahay camalfal qaunuuneed.

Qodobka 218aad

Ogeysiiska iyo duridda amarka

Waxaa la gaarsiinayaa dhinacyada go'aanka caddaynaaya dhicidda Dacwadda, waana la oggol—yahay in Jooga cawdo Garsooraha soo saaray naftiisa kaasoo ay u bannaan tahay inuu ka noqdo go'aanka.

Qodobka 219aad

Ka Maqnaanshaha Fadhiga

Haddii dacwadda oo socoto dhinacyada oo dhan ka maqnaadaan fadhliga, Garsooruhu wuxuu u qabanayaa fadhi cusub si ay u yimaadaan, haddiisa ay fadhliga labaadna ka soo qayb geli waayaan Dacwaddu way dhacaysaa.